# KULULAYNTA FOOSHA

the women's
the royal women's hospital
victoria australia

Marmarka qaarkood waa lagama maarmaan in la caawimo dumarka inay bilaabaan foosha iyada oo la isticmaalayo habab gacan-ku-abuura Kan waxaa loogu yeeraa foosha degdegta ah

## Waa maxay foolkululayntu?

Uurka badankiis, fooshu waxay ku bilaabataa dabiici ahaan inta u dhexaysa 37 iyo 42 asbuuc, ilaa ilmuhu ku dhasho. Foosha waa 'la-dedejiyaa' marka dhakhtarada iyo umulisooyinku ay dhiirigeliyaan habka foosha si loo bilaabo hab gacan ku foolin.

## Maxaa loogu taliyaa habka degdeg ku foolinta

Sababaha ugu badan oo caamka ah ee Khasab ku foolinta (fool-kululaynta) waa:

- uurka oo dhaafay 41 asbuuc
- biyaha oo ka dilaaca laakiin fooshii aanay si dabiici ah u bilaaban
- ilmaha oo aan fiicnay ama si fiica u korayn
- hooyada oo leh xaallad caafimaa oo mucayina

## Ma jiraan waxyaalla khatar ah

Waxaa jira khatara la xiriira fool-kululaynta. Dumarka qaarkood ma doonayaan in foosha laga keeno oo waxay doortaan 'habka sug oo arag wixii dhaca' bilaa foosha caadiga ahi bilaabatay.

Waxaa kaloo jira khatara la xiriira sii socodka uurka iyada oo lagu taliyey in khasab lagu dhaliyo.

Ka hor intaan go'aan la samayn, dhakhtarkaaga ama umulisada ayaa kuu sharxi doona khataraha ka iman kara in aan khasab lagu dhalin ama lagu dhaliyo.

## Sidee foosha loo soo dedejiyaa?

Waxaa jira afar nooc oo foosha lagu dedejiyo:

- prostaglandin
- a balloon catheter
- Iyada oo biyaha gacanta lagu dilaaciyo
- oxytocin.

Dumarka badankood waxay u baahan yihiin isku darka kuwaan ka hor inta aanay ilmaha dhalin.

## Maxaa dhacaya maalinta Khasab ku foolinta?

Go'aan ayaa laga yaabaa in la sameeyo si loo bedelo habkaaga Khasab kuumulinta maalinta Khasab ku umulinta. Ka dib marka siilka laga eego, isbedelka afka ilmagaleenka ayaa u muuqan kara in hab kale oo khasab ku umulin ah uu ku haboonaado. Dhakhtarkaaga ama umulisada ayaa kaala hadli doonta arrintaan.

### Ilaa intee qaadanaysaa?

Marka foolkululayntu bilaabato, si joogto ah ayaa laguula soconayaa. Isbitaalka dhexdiisa waa ku socsocon kartaa laakiin maaha inaad isbitaalka ka baxdo. Afka ilmagaleenka si joogto ah ayaa loo eegaa horumarkiisa. Fool kululaynta maaha hab degdeg ah. Markuu bilawdo, waxaa laga yaabo inuu qaato 24 saacadood ilaa ilmahaagu ka dhasho. Haddii afka ilma-galeenku u baahan yahay mudnaan, waxaa laga yaabaa inay qaadato laba maalmood ama ka badan.

### Waad bedeli kartaa maskaxdaada ka dib foolkululaynta marka fooshu bilaabato?

Marka fool keenida khasabka ahi bilaabato, waxaa la filaya in la sii wado ilaa ilmuhu ka dhasho. Kuma talinayno in la joojiyo habka khasab ku umulinta.

### Ma ka xanuun badan tahay foosha caadiga ah?

Dhamaan fooluhu waa kala duwan yihiin. Dumarka qaarkiis fooli kululayntu way ka xanuun badan tahay foosha caadiga ah ee kelideed iska bilaabata, dumar walbase kuma dhacdo taasi. Irbada dhabarka la iskaga duro ayaa oo xanuunka bi'isa ayaa la helli karaa haddii loo baahdo.

### Ma shaqaynaysaa?

Marmarka qaarkood foolkululayntu ma shaqayso waxaa laga yaabaa in aan fooli ku qaban. Haddii taasi dhacdo dhamaana xalalka amaankana la isku deyey, waxaa laga yaabaa in inaad u baahato in ilmaha lagugu soo qalo.

## Hababka fool kululaynta badankood

Habka fool-kululaynta aad u baahan tahay waxay ku xirnaan doontaa sida uu diyaarka u yahay afka ilmagaleenku (luqunta ilmagaleenkaaga) uu diyaarka ugu tahay foosha. Dhakhtarkaaga ama umulisadu waxay kaa eegi doonaa siilka si ay u hubiso afka ilmagaleenkaaga ka dibna kaala hadasho habka kugu haboon.

Haddii afka ilmagaleenkaagu aanu fool diyaar u ahayn, waxaa laga yaabaa inaad u baahato 'diyaarin'. Diyaarintu waxay caawintaa in ilmagaleenkaaga la diyaariyo iyada oo la isticmaalayo balloon catheter ama prostaglandin.

Hababkaani waxay caawimaan in afka ilmagaleenkaagu aanu badanaa bilaabin foosha.

Diyaarinta afka ilmagaleenka 6 ilaa 48 saacadood Marka afka ilmagaleenkaagu furmo, waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay:

- in biyaha la dilaaciyo
- oxytocin, daawo bilawda qaqabashada foosha

Waxay u badan tahay in aad labadaba qaadanayso ka hor inta aadan foosha gelin oo aadan dhalin ilmahaaga.

## Prostaglandin

Prostaglandin waa gel ama kiniini la geliyo siilkaaga si uu u jilciyo afka ilmagaleenka wuxuuna kaa caawimaa diyaarinta heerka labaad ee foosha.

Marka prostaglandin-ta la geliyo, waxaad u baahan doontaa inaad jiifto ugu yaraan 30 daqiiqo oo aad joogto isbitaalka caadatan ilaa fooshu bilaabato.

### Waxyaallaha ay tahay inaad ogaato

- Prostaglandin-tu marmarka qaarkood waxay keentaa in siilku xanuuno.
- Tira aad u yar oo dumara ayaa waxaa ku dhaca xasaasiyad sida yaqyaqsi ama shuban.
- Marmarka qaarkood, prostaglandin ayaa u keeni karta ilma galeenka (womb) inuu aad u ururo. Haddii taasi dhacdo, waxaa lagu siin doona daawo si ilmagaleenku u debco.
- Dumarka badankiis ayaa u baahan doona caawimo si fooshu u qabato.

## Balloon catheter

Tuubo dhuuban oo loogu yeero catheter, oo ku leh balloon dhamaadka ayaa la geliyaa afka ilmagaleenka ka dibna balloonka ayaa biya laga buuxiyaa. Tan waxaa loogu yeeraa balloon catheter waxaana loo isticmaalaa in cadaadis la saaro afka ilma galeenka. Waxay caawintaa in la furo, iyada oo u diyaarinaysa qaybta ku xigta ee foosha.

Catheter-ka waxaa loo daayaa halkaas ilaa 12 saacadood, ka dib marka biyaha laga saaro balloon-ka, waxaa laga saaraa catheter-ka. Waad warwareejin kartaa caadatan markay halkeeda ku jirto.

Ka dib waxaa laga saaraa catheter-ka, waxaa lagaa eegi doona siilka si go'aan looga gaaro talaabada ku xigta.

### Waxyaallaha ay tahay inaad ogaato

- Dumarka badankood waxay u baahan doonaan caawima intaas ka badan si ay fooshu u qabato.

## Gacan ku dilaacinta xuubabka (ARM)

Habkaani badanaa waxaa loo yaqaan dilaacinta biyahaaga.

Marka afka ilmagaleenka si fiica   loo furo, dhakhtarkaaga ama kalkaalisada caafimaadk   ayaa isticmaali doonta aallad yar oo leh wax go'dan dhamaadka si loo dilaaciyo biyahaaga. Kani wax ma yeellayo laakiin baarista ayaa noqon karta mid aan raaxo lahayn. Biyuhu waa sii socon doonaan si ay ugu dhamaadaan inta fooshu socoto.

### Waxyaallaha ay tahay inaad ogaato

- In kasta oo dilaacinta biyuhu badanaa ay yihiin wax toos ah, waxay siyaadin kartaa khatarta ah in xuduntu soo dhacdo, dhiig bax ama infakshan. Dhakhtarkaaga ama umulisada ayaa daryeelii doona si looga fogaado midaan laakiin waxaa loo tababaray wax looga qabto xaallad kasta oo degdeg ah oo laga yaabo inay dhacdo.
- Badanaa waa wax aan dhicin in fooshu bilaabato biyahaa ka dilaacisay dartood. Waxaa fiica   inaad bilawdo isticmaalida oxytocin isla marka biyuhu kaa dilaacaan.

## Oxytocin

Daawadani waxay la mid tahay hormone-ka kuu keena inaad yeellato fool dabiici ah. Irbad ayaa la geliyey xididkaaga ka dibna waxaa lagu xiraa weel ay ku jirto oxytocin.

Bam ayaa kantaroolla qadarka daawada oxytocin ka ah ee lagu siiyey. Umulisadaada ayaa daari doonta nus saac walba ilaa ay fooshu kaa qabato. Dhererka waqtiga ay qaadataa waa kala duwan yahay dumarka laakiin waxay qaadan kartaa saacada badan.

Umuliso ayaa kula joogi doonta inta dhibcuhu kugu socdaan. Heerka garaaca wadnaha ilmahaaga ayaa lala socon doona inta fooshu ku hayso adoo isticmaalaya mishiinka CTG.

**Waxyaallaha ay tahay inaad ogaato**

- Awooda aad ku socsocoto waxaa xadadi doona dhibcaha mishiinka CTG
- Marmar, oxytocin waxay keeni karaan in afka ilmagaleenku aad isugu ururo. Haddii taasi dhacdo waxaa lagu weydiin doona inaad u jiifsato dhinaca bidix dhibcahana waa la xadadi doona ama la joojin doonaa. Daawa kale ayaa laga yaabaa in lagu siiyo si hoos loogu dhigo qabqabashada. Taas ayaa laga yaabaa in la sameeyo haddii uu jiro welwel ku saabsan ilmahaaga garaaciisa wadnaha. Dhakhtarkeena iyo umulisooyinka ayaa loo tababaray inay wax ka qabtaan arrimahaan.
- Haddii fool-kululayntaadu ay tahay oxytocin, ma aad awoodi doonto inaad ilmaha ku dhasho biyaha dhexdooda.

Watch our short video about induction of labour at
https://www.thewomens.org.au/hi-iol

# HADDII ISBITAALKA THE WOMENS KUGU SAMAYNAYO FOOLKULULAYN

## Maalinta fool-kululaynta

**Fadlan imaw waqtiga la ta'kiidiyey.**

- haddii aad daahsan tahay, foolkululayntaada dib ayaa loo dhigayaa.
- horay u imaanshaha macneheedu maaha in horay laguu arkayo.

Ka dib marka isbitaalka lagu dhigo, dhakhtarkaaga ama umulisada ayaa:

- kugu samayn doonta baarista siilka si aad ay u qiimeeyaan afka-ilmagaleenkaaga.
- eeg ilmahaaga booskiisa (dhinaca uu ku jiro).
- isticmaal aallada lagula socdo dhaqdhaqaaqa wadnaha ilmaha.

Eegista siilka ayaa ka caawimaysa dhakhtarka ama umulisada inay go'aan ka gaaraan sida afka ilmagaleenkaagu diyaar u yahay foosha. Ka dib waxay kaala hadli doonaan dariiqada foolkululayntu ugu haboon tahay.

Foolkululayntaadu waxay badanaa bilaabanaysaa saacad gudaheed jiifisk ka dib, si kasta ha ahaatee, tan waxaa laga yaabaa in gadaal loo dhigo ama jadwalka la bedelo haddii isbitaalku aad mashquul u yahay.

Annaga oo fahansan in aadan jeclaysanayn daahida, waxaan rabnaa in aan adiga iyo ilmahaagaba siino daryeelka ugu fiica oo aan awoodi karno mana bilaabayno foolkululayntaada haddii aanu joogin qof si fiica ku daryeellaa. Waan kula socodsiinaynaa da'daalka ugu fiica ayaana samayn doona si aan u gaabino daahista intaan awoodno.

## Waqtiga iyo taariikhda foolkululaynta (Time and date of your induction)

Taariikhda: ..........................................................................
(Date)

Waqtiga imaanshaha: ..........................................................
(Time to arrive)

Meesha la aadayo: ...............................................................
(Where to go)

Foolkululaynta lagu talinayo.
(Proposed induction method)

..........................................................................................................

Waan ku soo wacaynaa si aan u ta'kiidino taariikhda iyo waqtiga. Marmarka qaarkood waa laga yaabaa in aan dib u qoondayno arrintaan.

## Nala xiriir

Si aad ula hadasho umulisada wixii ku saabsan foolkululaynta

- Parkville: (03) 8345 2170
  Isniinta – Jimcaha - Jimcaha
  (8:30 subaxii – 4:30 casarkii)
- Sandringham: (03) 9076 1245
  Isniinta – Axada (24 saacadood)

**AFEEF** Xaashida xaqiiqadu waxay bixisaa macluumaad guud keliya Tala mucayina oo ku saabsan ilmahaaga ama baahida daryeelka caafimaad waa inaad raadisaa talada aqoonyahanada caafimaadk Isbitaalka Royal Women's Hospital ma aqbalo wax masuuliyad ah oo lumitaan ama khasaaro ah oo ka timaada ku tashiga xaashidaan halkii aad ka arki lahayd aqoonyahan caafimaad Haddii adiga ama ilmahaaga yari u baahan yahay ka warhayn caafimaa oo degdeg ah la xiriir qaybta xaalladaha degdegta ah ee kuugu dhow. © The Royal Women's Hospital 2018